



Tallaallada adigaas ka weyn 65 sano

Halista in loo xanuunsado infekshanno halis ah waxay la badataa da'da. Sidaas darteed ayaa lagu casuumayaa dhowr tallaal oo muhiim ah gebi ahaan inta jirta ama ka weyn 65 sano degganna Västra Götaland (Galbeedka Götaland).

1177



VÄSTRA
GÖTALANDSREGIONEN

Waxaad isku tallaali kartaa xaruntaada caafimaadka ama qaabilaad tallaal.

Tallaalka covid-19 waxaa la bixiyaa dayrta

Tallaaladu waa u bilaash kooxaha lagu booriyay:

- Adigaa jira ama ka weyn 75 sano.
- Adigaa u dhexeeya 65 iyo 74 sano oo ka tirsan koox caafimaadeedka halista u nugul.
- Adigaa jira ama ka weyn 65 oo guriga ku leh daryeel maalmeedka, tusaale ahaan adeegga guriga (hemtjänst) ama hoyga gaarka ah (särsklit boende, SÄBO).

Tallaalka infuluwensaha waxaa la bixiyaa dayrta

Waxaad u baahan tahay inaad dayr kasta is tallaasho si aad u hesho difaac fiican oo ka dhan infuluwensaha. Tallaalku waa kuu bilaash adigaa ka weyn 65 sano.

Tallaalka pneumokoki sannadka oo dhan ayaa la bixiyaa

Pneumokoki waa bakteeriyada ugu badan ee sababta burunkiitada. Waxaa laguugu boorinayaa inaad is tallaalsho hal mar shantii sano.

- Adigaa jira ama ka weyn 75 sano ayaa tallaalka lagu boorinayaa. Waana bilaash.
- Adigaa u dhexeeya 65 iyo 74 sano ayaa tallaalka lagu boorinayaa. Waana bilaash haddii aad ka tirsan tahay koox caafimaadeedka halista u nugul.

Ka sii akhri 1177.se

Bogga 1177.se waxaad si dheeri ah uga akhrisan kartaa tallaalada, iyo inaad ka tirsan tahay koox caafimaadeedka halista u nugul iyo sida aad yeelaysid si aad ballan u qabsatid:



1177.se/vastra-gotaland/vaccinationer-for-dig-over-65